



Ku soo dhawow inaad macmiil ka noqoto Swedbank iyo Sparbankerna

Si aad macmiil uga noqoto Swedbank ama bangi keydsi waa inaad is cadeeyso oo aad qeexto sababta aad ugu baahan tahay koonto bangi. Waxaa halkaan lagugu soo gudbinayaa tusaale ku saabsan warbixinaha bangigu kaaga baahan yahay markaad tagto xafiis bangi.

Iscaddayn

Haddaad leedahay lambar aqoonsi oo iswiidhish ah

Haddii aad leedahay lambarka shakhsiga oo iswiidhish ah waa inaad isku caddeysaa kaadh ama baasaboorka iswiidhish ah oo shaqeynaaya.

Haddaad leedahay lambarka shakhsiga oo iswiidhish ah

Haddi aanad lahey lambarka shakhsiga oo iswiidhish waa in aad isku caddeysaa baasaboorka waddankaaga oo shaqeynaaya kaas oo caddeynaya dalka aad muwaadin ka tahay.

Wadamada uu heshiiska Schengen ka dhaxeeyo ayuu shaqeynayaa kaadhka la midka ah ka ID-da iswiidhishka ee aqoonsiga wadankaasi uu bixiyey.

Markaad isku cadeynayso aqoonsi wadan kale ayaad u baahn tahay in aqoonsigaaga lagu xaqiijiyo dokumenti kale, tusaale ahaan sharciyada deggenaanshaha waddanka, shahaadada shaqada, qoraal dhiwaanka hey'adda canshuuraha ama warqad cadeyn dugsi.

Haddii aanad fahmin iswiidhish ama ingiriisi

Haddii aanad fahmin iswiidhish ama ingiriisi ayaad u baahan tahay qof adiga kuu turjuma.

Waxa muhiim ah inaynu is fahano, inaad adigu macmiil ahaan fahanto xuquuqdaada iyo waajibaadkaaga iyo in aanu helno su'aalo adiga iyo dhaqaalahaaga khuseeya.

Baahida koonto bangi

Dhamaan bangiyada iswiidhan sida sharciga ah waa inay ku weydiiyaan waxaad uga baahan tahay koonto bangi iyo sida aad u isticmaali doonto. Waxay noqon kartaa in mushahar ama gunno kale laguugu shubayo, inaad kirada ka bixineyso ama aad wax ku kaydsanayso.

Xafiisyadayada bangi ma qabtaan kaashka. Weydii markaa bangiga sida aad lacagta ugala baxayso ama hab kale oo aad wax ugu bixin karto oo aan aheyn kaash.

Kaadhkaaga bangiga iyo macluumaadkaaga bangigu waa qaar adiga kuu gaar ah. Kaadhkaaga ama koontadaada waa in aaney cid kale isticmaalin. Waxa muhiim ah inaad ka digtoonaato kaadhkaaga iyo macluumaadka koontadaada. Ka fikir sidoo kale in aanad waligaa cid kale u sheegin lambarkaaga sirta ah.

Haddii aad u baahan tahay warqada bangiga si aad u hesho kaalmada dhaqaalaha, waa inaad booqato xafiiskaaga bangiga ee kuugu dhow halkaas oo ay kaa caawin doonaan inay lacag la'aan kuugu dalbaan warqada bangiga oo bishii ah.

Xaqa koonto bangi

Qofka walba, isagoo aan loo eegeyn wadanka uu ka soo jeedo ayuu u leeyahay xaq in uu furto koonto bangi, taas oo ay khuseyso damaanadda lacag kaydsigu. Laakiin, mararka qaarkood waxaa bangiga ku qasban in uu kuu diido inaad koonto furto. Bangigu koonto kuuma furayo tusaale ahaan:

- haddii uusan bangigu kuu caddayn karin hab sugan
- haddii uu bangigu u arko in warbixinta aad soo gudbisay oo ku saabsan sababta aad u dooneyso inaad koonto u furto aanay ahayn mid dhammaystiran



Soo bandhigida bilowga

Dalabka aanu kuu soo bandhigayno bilowga waxay aasaas u tahay in aad lacag ku shuban karto oo aad maareyn karto lacag bixintaada.

Waxay ka kooban tahay:

- Koontada bangiga
- Kaadhka bangiga
- Adeega lacag bixinta



Qofka fahmaaya iswiidhishka ama ingriisiga ee adeegyada dhijitaalka si kalsoon u isticmaali kara ayay jiraan adeegyo kale. Weydii bangiga waxa adiga kugu haboon.

Xogta

Sharciga tallaabooyinka ka dhanka ah habka lacag maydhista iyo maalgelinta argagixisada

Iswidhan waxay leedahay sharci, sharciga tallaabooyinka ka dhanka ah lacag maydhista iyo maalgelinta argagixisada, kaas oo tusaale ahaan ka hor tagaaya maalgalinta falalka danbiyada ee ka dhaca bangiga. Sharcigu waxa weeye inaannu anagu bangi ahaan xaq u laheyn inaannu furno koonto ama sameyno khidmadaha bangiga haddii aananu jawaab ka helin sababta ay macaamiishu ugu baahan tahay koonto iyo sida loo isticmaalaayo.

Damaanadda lacag kaydsiga

Iswidhan waxa jira damaanadda lacag kaydsig. Taas micnaheedu waxa weeye in macaamiishu ay dawlada ka heli doonto mag dhow ilaa qiime go'an ah haddii uu bangigu kaco.

Kaashka

Swedbank, sparbankerna iyo bangiyada kale oo badan iyo hay'ado kale, ayaa si firfircoon uga shaqeeyaa sidii loo dhimi lahaa kaashka bulshada dhexdeeda. Waxaanu sidaas darteed macaamishayada ku dhiirigalinaynaa inay kaadh wax ku bixiyaan, oo ay kaashka ka qaataan bangiga marka ay ka adeeganayaan dukaanka, lacagta kaga shubtaan mishiinka lacag shibashada iyo inay lacagta kala baxaan mishiinka lacagta/ATM-ka.